بسم الله الرحمن الرحيم

# Dastuurka KMG ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya

## BAYDHABO – 09- 2014

## ARAR

Magaca Allah ee naxriista guud iyo mida gaar ahba naxariista.Anaga oo ah shacabka dega Goboladda Koonfur Galbeed (Shabeellaha hoose, Baay iyo Bakool) ee Soomaaliya.Si aan dhidibada ugu aasno Nabad, Cadaalad,Sinaan iyo Horumar, ugana soo kabano dhibaatooyinkii dagaalada sokeeye ay ku reebeen Goboladan. Anagoo ogsoon in midnimada ummadda soomaaliyeed ay muqaddas tahay, isla markaasna raaceyna Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya qodobka 49aad farqadiisa 6aad.

## <u>Cutubka 1aad:- MABAADII'DA GUUD</u>

### Qodobka 1aad: Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed.

Magaca Dowlad Goboleedka iyo Xuduudihiisa waa sida hoos ku xusan:

1. Magaca Dowlad Goboleedka waa **"Koonfur Galbeed Soomaaliya"** oo ka kooban Gobollada Shabeelaha hoose, Baay iyo Bakool.
2. Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya (KGS) waxay xubin ka Tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Dhulka & Xuduudaha Dowlad Goboleedka:
   a) Dhulka Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay dhulka Dowlad Goboleedka KGS oo idil, oo ay ku jiraan Berriga, Badaha, Jasiiradaha & Uurkooda hoose,hawada sare iyo dhul,deegaan iyo biyo goboleed kasta oo ku soo biira Dowlad Goboleedka KGS si waa faqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomaaliya iyo sharci uu Baarlamaanka Qaranku ansixiyo.
   b) Khilaaf ka dhasha dhinaca xuduudaha waxaa ka wada hadlaya maamul Goboleedyada ay khuseyso Iyo Dowladda Federaalka Soomaliyeed.

### Qodobka 2aad: Diinta

1. Islaamka waa diinta DGKGS
2. Diin aan aheyn Islaamka laguma faafin karo deegaanada KGS

Xeer kasta ee aan waafaqsaneen Shareecada Islaamka waa waxba kama jiraan.

**Qodobka 3aad: Mabaadi'ida Asaasiga:**

1. Dastuurka Dowlad Goboleedka waxaa saldhig u ah kitaabka Alle iyo Sunnada Rasuulka (NNKH) iyo Dastuurka Qaranka.
2. Wuxuu waajib ka dhigayaa dhaqan gelinta nidaamka Dimuqraadiyadda, Maamul wanaaga, Cadaaladda, Sinnaanta, wada tashiga iyo awood qeybsiga.
3. Wuxuu xaqiijinayaa kala madax banaanida awoodaha fulinta, Sharci dejinta, Garsoorka iyo Xaquuqda Dadka laga tirada badan yahay.
4. Wuxuu ku saleysan yahay nidaamka isla xisaabtanka, hufnaanta iyo maamul loo wada dhan yahay.
5. Wuxuu waajib ka dhigayaa sareynta Sharciga iyo ku dhaqanka mabaadi'ida guud ee baaqyada Caalamiga ah ee xuquuqda Aadanaha.

**Qodobka 4aad:Sareynta Dastuurka.**

1. Kitaabka Allaah iyo Sunnada Rasuulka (NNKH) Ka dib Dastuurkan ayaa ah sharciga ugu sareeya kuna dhaqmeyso Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya.

**Qodobka 5aad: Afka Rasmiga ah.**

1. Afka rasmiga ah ee Dowlad Gobleedka waa af- soomaali lahjadihisuna ay kala yihiin (Maay iyo Maxaatiri)
2. Carabiga iyo Ingriisiga waa Afafka Labaad ee Dowlad Goboleedka

**Qodobka 6aad: Calanka iyo Astaanta Dowlad Goboleedka:**

1. **Calanka**

Calanka Dowlad Goboleedka KGS waa:- qeebta sare laydi buluug furan ah ah oo dhexda ku leh xiddig cad oo shangees ah, madaxyo simanna leh dhexda gaduud xagal dadban ah, dhanka hoose cagaar dhexda ku leh lix xidigood oo wareeg ah.

2. Astaanta Dowlad Goboleedka.

Astaanta Dowlad Goboleedka KGS waxay ka kooban tahay gaashaan dhexda kaga yaal calanka Dowlad Goboleedka oo leh xadiyad maar ah, oo dheeh qalin ah leh, gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo carbeed oo lix ah mid walibana ay dhexda xiddig kaga taal hareerahana waxaa ka haya laba harimacad oo isu tusmeeysan, kuna kala taagan laba waran oo is weeydaar ah caarada hoose ee gaashaanka, ayna wehliyaan laba caleen oo Moos ah diilin buluug ah ay ku qoofalan tahay.

**Qodobka 7aad: Magaalo Madaxda Dowlad Goboleedka**

1. Magaalo Madaxda Dowlad Goboleedka waa Baraawe.
   - **A.** Marko waa magaalo madaxda Ganacsiga iyo dekadda ee Dowlad Goboleedka.
   - **B.** Baydhabo, Xudur iyo Marko waa magaalo madaxyada gobolada Baay, Bakool Iyo Sh/hoose.
   - **C.** Magaalo madaxda waxaa lagu dhaqayaa xeer gaar ah oo uu soo

saari doono Golaha Wakiilada Dowlad Goboleedka mudo hal sanno gudahiisa ah, laga bilaabo markii uu dhaqan gal noqdo Dastuurkan.

**<u>Cutubka 2aad:-</u> Xuquuqda aasaasiga iyo waajibaadka muwaadinka:**

**<u>Mabaa'diida guud ee Xuquuqda Aadanaha</u>**

**Qodobka 8aad: Muwaadinka iyo Jinsiyadda**

Muwaadinnimada Dowlad Goboleedka waxaa soo cadeynaya:

1. Degmada uu qofka ka soo jeedo.
2. Muwaadinka Dowlad Goboleedka ma luminayo Jinsiyadiisa markii uu dhalasho kale qaato.
3. Helidda iyo luminta muwaadinnimada Dowlad Goboleedka, waxaa xeer gaar ah ka soo saaraya Golaha Wakiilada mudo Sanad gudihiisa ah, ka dib markii la ansixiyo Dastuurkan.

**Qodobka 9aad: Karaamada Aadanaha.**

1. Karaamada aadanuhu waa deeq ilaahey subxaanahu watacaalaa ku

maneestay qof kasto oo bani aadan ah, xuquuqda aadanuhu deeqdaas ayeey ka dhalataa

2. Karaamada Aadanaha waa laguma xadgudbaan dhowristeedana waa

waajib saran dalka oo dhan iyo Dowladd Goboleedka.

3. Awooda Dowladda waa in aan marnaba loo isticmalin meel ugu

dhicid karaamada aadanaha.

4. Dhaqan gelinta iyo ilaalinta dhamaan Axdiyada Caalamiga ah ee la

xiriira dhowrista xuquuqda aadanaha.

5. Muwaadin kasta wuxuu si xor ah u cabiri karaa ra'yigiisa, qofna looma ciqaabi karo aragtidiisa.

6. Muwaadin kasta oo Soomaali ah wuxuu xaq u leeyahay:

a) In uu dego, ka shaqeysto, ku socdaalo meel kasta oo ka mid ah deegaanada Dowlad Goboleedka KGS.

b) In uu ka qeybgalo, abaabulo ururo Siyaasadeed ama kuwo bulsho hadii uu u dhashay sadexda gobol.

c) In uu wax doorto ka dib mar hadii ay da'diisu gaarto 18 Sano.

**Qodobka 10aad: Sinaanta Bulshada**

1. Dhammaan dadka ku nool Dowlad – Goboleedka, wey u siman Yihiin Sharciga hortiisa.

2. Qofna laguma takoori karo Midabka, Diinta, Dhalashada, Jinsiyada, lixaada, Hantida, Fikirka Uu aamisan yahay.

3. Dastuurka wuxuu sugayaa xuquuqda dadka laga tirada badan yahay.

**Qodobka 11aad:Xuriyadda Caqiidada**

1. Qofka Muslimka ahi, Kama noqon karo Diinta Islaamka

**Qodobka 12aad: Xuriyadda Fikirka**

1. Qof kasta xur buu u yahay fikradiisa iyo soo bandhigeeda.

2. Qofka wuxuu fikradiisa ku cabiri karaa qaab hadal, saxaafad, qoraal baahin, muuqaal, suugaan iyo hab kale oo xeerka waafaqsan xad – gudub la'aan.

**Qodobka 13aad: Xaqa Doorashada**

1. Muwaadhin kasta oo buuxiya shuruudaha Doorashada looga baahan yahay wuxuu xaq u leeyahay in uu wax doorto, lana doorto.

2. Codayntu waa shaqsi, sinnaan, xuriyad iyo qarsoodi.

**Qodobka 14aad: Xaqa Arji qoroshada**

1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu cabasho qoran u diro Madaxweynaha, Baarlamaanka iyo Xukuumadda.

1. Cabasho kasta oo xeerka waafaqsan Dowladdu waa in ay ka jawaabtaa 60 (lixdan) Cisho gudahooda.

**Qodobka15aad: Xaqa ka mid Noqoshada Ururada**

1. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha Doorashada, wuxuu xaq u leeyahay in uu ka Qayb qaato hawlaha, ka mid noqosho ama aasaaso Ururo Siyaasadeed, dhaqaaleed, Bulshadeed, cilmiyeed iyo dhaqmeed

2. Waxaa reeban jiritaanka Ururada leh ujeedooyin lid ku ah qawaaniinta Dalka iyo Danaha Ummadda.

3. Ururada leh shaqsiyadooda qaannuun, heshiisyada ayay xubnuhu ku galaan ururada, Waxa uu waajib ku wada noqonayaa dhammaan xubnaha ururka

**Qodobka 16aad: Xuriyadda Dhaqdhaqaaqa**

1. Muwaadin kasta ama qof kasta oo si xeerka waafaqsan dalka ku jooga wuxuu u madax bannaan yahay inuu dalka ku maro ama ka dego meel kasta oo uu rabo, iyo inuu dalka

Ka baxo kuna soo laabto goortii uu doono

2. Meelaha iyo goobaha ay reeban tahay maridooda iyo galidooda xeer gaar ah ayaa lagu soo saarayaa.

**Qodobka 17aad: Xaqa Lahaanshaha Gaar ahaaneed**

1. Muwaandin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu yeesho Hanti ugaar ah

2. Waxaa reeban wax soo Saar kasta oo aan sharciga waafaqsaneyn.

3. Qofna lagama qaadi karo canshuur ama Hanti aan sharciga waafaqsaneyn

**Qodobka 18aad: Xaqa Nolosha iyo Nabadgelyaynta Qofka**

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay Noloshiisa, waxaana keliya oo noloshiisa uu ku wayn Kara markii ay Maxkamad horteeda kaga cadaato dembi dil lagu mutaysan karo.

2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nabad–galyaynta jirkiisa iyo sharaftiisa.

3. Waxaa reeban dembiyada laga galo xuquuqda Aadamiga ah, sida: Xasuuqa iyo

dil maxkamad la’aaneed

**Qodobka 19aad: Xaqa Madaxbanaanida Qofka**

1. Qofna xuriyadiisa lagama qaadi karo, lama baari karo, lama xayiri karo haddii aan qaynuun ogolaan.

2. Adoonsiga iyo ka ganacsiga dadku way reeban yihiin.

3. Dhammaan xuriyada qofka waxaa shardi u ah inaysan ka hor–imaanin shareecda Islaamka, xeerarka anshaxa guud, xasiloonida dalka ama xuquuqda qof kale.

4. Dastuurka ayaa qof kasta u damaanad qaadaya xuquuqdiisa iyo xuriyadiisa.

**Qodobka 20aad: Xaqa magan gelinta siyaasadeed iyo isku celinta ee deysanayaasha/ danbiilayaasha**

1. Ma bannaana in muwaadin ka tirsan Dowlada – Koonfurta – Galbeed loo dhiibo Dowlad kale.

2. Dowlada Goboleedka Koonfur Galbeed, waxay dib u celin kartaa dembiile ama eedaysane shisheeye ah, oo dalkiisa ka soo cararey, haddii uu jiro heshiis dad isu celineed oo dhex mara Doladda Federaalka iyo Dalkaasi

**Qodobka 21aad: Xaqa Hoyga**

1. Hoyga iyo meelaha kale ee la degan yahay, waxay leeyihiin xur-mayntooda.ma bannaana baarida, basaasidda iyo galida hoyga haddii aan amar garsoore oo sababaysan jirin ama sharcigu si kale u sheegin.

2. Waxaa waajib ah in si toos ah looga akhriyo amarka garsooraha milkiilaha ama deganaha hoyga inta aan la gelin.

**Qodobka 22aad: Xuriyadda Saxaafadda**

1. Saxaafada iyo warbaahinta waa madax-bannaan yihiin, lamana fara gelin karo.

2. Xeer gaar ah oo ay golaha fulinta soo saaraan, ayna golaha wakiiladu ansixiyaan ayaa faah–faahinaya nidaamkooda.

**Qodobka 23aad: Xaqa Xuriyadda Isgaarsiinta**

Qofna lama fara gelin karo waraaqihiisa Boostada, xiriirkiisa isgaarsiineed iyo

Saxaafadeed iyo Qoraaladiisa gaarka ah, marka laga reebo xaaladaha xeerka bannaynayo baaritaankoodi, dabagalkooda ama dhagaysigoodi, iyadoo ay markaasna waajib tahay in la helo amar Garsoore oo sababaysan.

**Qodobka 24aad: Xuriyadda Kulamada iyo Banaan baxyada**

1. Qof kasta wuxuu xur u yahay inuu sameeyo kulamo iyo bannaan–baxyo ku salaysan hab nabadgelyo, waase inuu sii wargeliyaa Hay'adaha ay khusayso.

2. Kulamada iyo bannaan–baxyada waxaa lagu joojin karaa sababo lid ku ah Diinta Islaamka, Caafimaadka guud, Amniga, Anshaxa, Nidaamka guud iyo Xasiloonida.

**Qodobka 25aad: Qoyska**

1.Qoyska waa Aasaaska bulshada Soomaaliyeed.

2. Qoys Walibaa wuxuu ku dhismaa si waafaqsan shareecada islaamka.

3. Qoys walbaa wuxuuna xaq u leeyahay damaanad qaad xuquuqdiisa Dastuuriga ah.

**Qodobka 26aad: Xuquuqda Haweenka**

1- Haweenku waxay leeyihiin xuquuq, xuriyad, waajibaadka dhaqan–dhaqaale iyo siyaasadeed aan Diinta Islaamku ka reebin.

2- Dowladda Dhexe & tan Goboleedka ayaa waa jib ka saran yahay ilaalinaysa xuquuqda Haweenka ee ku xusan Qodobkan.

3- Haddii nolosha Hooyo Uur lihi halis gasho, waxey xaq u leedahay bad baadinta nafteeda.

4- Waxa reeban in la soo rido Ilmaha caloosha ku jira hadii aysan jirin xaalada ku xusan Far. 3aad

**Qodobka 27aad: Xuquuqda Caruurta.**

1- Caruurta waxaa loola jeedaa qof kasta oo 15 (Shan iyo toban sano) ka yar

2- Ilmaha wuxuu xaq u leeyahay nolol, magac, jinsiyad iyo korin.

3- Waxaa reeban shaqaaleynta caruurta ee wax u dhimaysa noloshooda,

dhaqankooda, Koriimadooda iyo Waxbarashadooda.

**Qodobka 28aad: Xuquuqda Agoonta, Curyaaminta iyo Dadka dhimirka la'**

1- Naafada ama Muwaadin kasta oo aan is daryeeli karin, cid daryeeshana aaney haysan,Dowlada Goboleedka ayey waajib ku tahay daryeel kooda.
2- Dowladu waa inay dhiiri – gelisaa, samaysaana Hay'ado daryeela dadka Qodobakan ku tilmaaman.

**Qodobka 29aad: Xuquuqda Caafimaadka**

1. Dowlada ayaa u xilsaaran Caafimaadka guud, gaar ahaan kan Caruurta iyo Hooyada, ka hortaga cudurrada faafa, Nadaafad darida & fasaqanka bii'ada.

2. Dowlada ayaa xil ka saaran yahay horumarinta adeegyada Caafimaadka.

3. Dowladu way ogoshahay Rugo (Xarumo) Caafimaad iyo Isbitaalo gaar ah, xeer gaar ah ayaa nidaaminaya, waxayna kormeereysaa tayada & qiimaha adeegyadaasi.

**Qodobka 30aad: Xuquuqda Waxbarashada**

1. Horumarinta, Baahinta iyo Faafinta cilmiga iyo waxbarashada waa waajib ummadeed, meel marintoodana, Dowlad Goboleedka ayaa u xilsaaran.

2. Akhris Qoris la'aanta Afka Hooyo, waa cadowga 1aad ee Ummadda, waana waajib in la ciribtiro, Dowlada xil dheeraad ah ayaa ka saraan

3. Waxbarashada Aasaasiga ah, waxaa loo aqoonsan yahay:-

a) Dugsiyada Qur'aanka, Dugsiyada Hoose, Dhexe iyo Sare.

b) Ciyaaraha jirka iyo Isboortiga.

c) Waxbarashada Dadka waaweyn, xirfadaha iwm.

d)Waxaa jiraya Manhaj Midaysan oo u degsan guud ahaan Dalka.

4. Muwaadhin kasta wuxuu xaq u leeyahay taageero waxbarasho

5. Qofka qaan gaarka ahi, wuu u madax bannaan yahay Doorashadiisa waxbarasho iyo tan Xirfadeed.

6. Waxaa la furan karaa Dugsiyo Waxbarasho, Dugsiyo Xirfadeed iyo Jaamacado

gaar ah, waafaqsana Manhajka guud ee Dalka.

7. Dowladda goboleedka xil ayaa ka saraan Aqoonta & dhisida Jaamacado.

8. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya Waxbarashada Madaxa bannan.

**Qodobka 31aad: Xaqa Dacwada iyo Isdifaaca**

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad qaanuunka waafaqsan ka furto Maxkamadaha awooda u leh.

2. Qofkastaa waxuu xaq uleeyahay in uu helo garsoor madax banana caadil ah, laguna qaadayo maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo waqti macquul ah, ama golihii kale ee awood go'aan gaarin ah u leh:

   a) arin kasto oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka madaniga ah, ama
   b) Faldanbiyeed kasta oo kale lagu soo oogay ciqaabna lagu meteysanayo.

3. Qofna looma qaban karo, xiri karo fal markii uu galaayay aan dembi ku ahayn qaanuunka.

4. Ciqaab aan Maxkamad ka soo bixin cidna laguma fulin karo.

5. Dembi iyo ciqaab aan sharciga waafaqsanayn ma jiri karo, mas'uuliyada faldembiyeedkuna waa shaqsi.

**Qodobka 32aad: Xuquuqda Eedeysanaha**

1. Eedaysanaha waxaa loo aqoonsan yahay Dembi laawe ilaa si qaanuunka waafaqsan maxkamad si kama dambays ah danbi ugu cadeyso.

2. Eedaysanaha laguma hayn karo meel aan qaanuunka banaynin, waana in 48 Saac gudaheeda la horgeeyaa Garsoore.

3. Eedaysanaha waa in Maxkamad awood u leh si tafaftiran ugu akhriso dembiga lagu soo oogay.

4. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan Eheladiisa, Qareenkiisa, takhtarkiisa iyo Asxaabtiisa, wuxuu kaloo xaq u leeyahay in la damiinto, haddii sharcigu ogolyahay.

5. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu Qareen difaaca qabsado, haddii uusan awoodi karin, Dowladu waa in ay u qabato dadka garaad dhimanka ahna waa la mid.

6. Eedaysanuhu laguma qasbi qaro qirashada dembiga loo haysto.

7. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu isku difaaco Maxkamadda horteed.



GUDDIGA FARSAMADA EE MAAMUL U SAMEYNTA KOONFUR GALBEED SOOMAALIYA

**Qodobka 33aad: Xuquuqda Qofka Xukuman**

1. Qofka ay Maxkamad xukuntay oo xiran wuxuu xaq u leeyahay in la dhowro ilaalintiisa, nabadgelyadiisa iyo sharaftiisa Aadaninimo.
2. Xukumanuhu wuxuu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan Eheladiisa, Qareenkiisa, takhtarkiisa iyo asxaabtiisa.
3. Xukumanaha Xabsiga ku jira wuxuu xaq u leeyahay daryeel Caafimaad, cuno iyo waxbarasho.
4. Xukumanaha Xabsiga ku jira wuxuu xaq u leeyahay xuquuqda Caalamiga ah ee maxaabiista.
5. Xukumanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato xukunka Maxkamadu ku riday, isaga oo rafcaanku ku caddaynaya Maxkamadii xukuntay mid ka saraysa.

**Qodobka 34aad: Waajibaadka Muwaadiniinta**

1. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah adkanyta Nidaamka Ummadda iyo Ilaalinta Dowladdnimada.
2. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah dhowridda Diinta Islaamka, Dastuurka, Xeerarka dalka iyo bixinta Canshuuraha ku waajibey.
3. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah ka qaybgalka difaaca Dowlad Goboleedka koonfur Galbeed markii loogu yeero ama ay la gudboonaato.
4. Xeer ayaa qeexaya ciqaabta ka dhalan karta gudasha la'aanta waajibaadka ku xusan faqrada 1aad, 2aad iyo 3aad ee Qodobkan.

**Qodobka 35aad: Heshiisyada Caalamiga ah**

Dowlad Goboleedka waxay ilaalineysaa:

1- Dhamaan heshiisyada Caalamiga ah ee aan ka hor imaaneynin danaha iyo maslaxada Dowlad Goboleedka.
2- Dowlad Goboleedka waxay aqoonsan tahay kuna dhaqmaysaa Axdiyada Caalamiga ah ee ay Qaramada Midoobay iyo Qawaaniinta Caalamiga ah ee Dowlada Federaalka ay qeyb ka tahay.

3- Waxay xurmaynaysaa baaqyada Caalamiga ah ee dhowrista Xuquuqda Aadanaha iyo wixii kale ee aan ka hor imaaneynin Shareecada Islaamka iyo Qawaaniinta Dowlad Goboleedka iyo Jamhuuriyada Federaalka.

4- waxay xushmaynaysaa, Axdiga Midnimada Afrika (African Union), Jaamacada Carabta, (Arab League) Urur Goboleedka Horumarinta Geeska Afrika (IGAD) iyo Ururka Iskaashiga Islaamka (OIC)

5- Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya waxay Taageeraysaa hindisooyinka ah in khilaafaadka aasaasiga ah ee abuurma ama horeyba u jiray lagu dhameeyo wada hadal iyo hab nabadeed

6- waxay ka soo horjeedaa Argagaxisanimada iyo wixii la xiriira.

**<u>Cutubka 3aad:-</u> Qaab dhismeedka**

**Qodobka 36aad: Qaab dhismeedka Dowlad Gobaleedka KGS.**

**Qaab dhismeedka Dowlad Gobaleedka KGS waxuu ka kooban yahay sadex heer oo kala ah:**

a. **Golayaasha Dowlad Gobaleedka.**
b. **Garsoorka.**
c. **Maamulada gobolada iyo degmooyinka.**

**Qodobka 37aad: Golaha Wakiilada (Baarlamaanka)**

1. Golaha wakiilada (Barlamaanka) KGS waa hay'adda ugu sareysa ee sharci dejinta Dowlad Goboleedka.
2. Tirada xubnaha Golaha Wakiilada (Baarlamaanka) waa 95 Xubnood oo 20% ay Haween yihiin.
3. Baarlamaanka Dowlad Goboleedka waxaa soo xulaya

Odayaasha dhaqanka beelaha KGS, oo la tashanaayo siyaasiyiinta iyo wax garadka beelaha.

**Qodobka 38aad: Shuruudaha Ka mid Noqoshada Golaha Wakiilada**

Xubnaha ka mid noqonaya Golaha wakiilada waa in ay soo buuxiyaan

shuruudahan soo socda:

1. In uu Muslim yahay kuna dhaqmaa Diinta Islaamka.
2. In uu Soomaali yahay kana soo jeeda deegaanada Dowlad Goboleedka K/Galbeed
3. Inaysan da'diisu ka yareyn 25 sano
4. In uu dhimirkiisu fayow yahay
5. In uusan qabin xanuun ka hor istaagi kara gudashada waajibaadkiisa Shaqo
6. In uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta
7. Inaysan maxkamad horey ugu ridin xukun la xiriira faldanbiyeed.

**Qodobka 39aad: Mudada Golaha Wakiilada (Baarlamaanka)**

1. Mudada Golaha Wakiilada waa 4 sano oo laga bilaabayo maalinta xilka loo dhaariyo.
2. Golaha Wakiilada lama kala diri karo mudada afarta sano ah gudaheeda.

**Qodobka40aad:Awooda iyo Waajibaadka Golaha Wakiilada (Baarlamaanka)**

Golaha Wakiilada waxay leeyihiin awood sharci dejin oo ah:

1. Doorashada Guddoomiyaha Golaha Wakiilada iyo ku xigeenadiisa 1aad iyo 2aad.
2. Sameynta iyo ansixinta xeer – hoosaadka Golaha Wakiilada.
3. Kalsooni siinta ama u diididda Golaha Wasiirada Dowlad Goboleedka.
4. Ogolaanshaha, wax ka bedelka ama diididda miisaaniyadda Dowlad Goboleedka.
5. Ansixinta, wax ka bedelka ama diididda shuruucda ay u soo gudbinayaan Golaha wasiirada.
6. Ka doodidda iyo u codeynta moshin ka dhasha Golaha Wakiilada dhexdooda ama mooshin ay soo jeediyeen ugu yaraan toban kun oo qof oo ka mid ah shacabka dowlad goboleedka.

**Qodobka 41aad: Kalfadhiyada Golaha Wakiilada Dowlad Goboleedka.**

1. Golaha wakiilada wuxuu yeelanayaa kalfadhiyadisa caadiga ah laba jeer sanadkiiba, kalfadhi kastaaba wuxuu soconayaa 4 bilood.
2. Kalfadhiyada aan caadiga aheyn waxaa iskugu yeeri kara gudoomiyaha golaha wakiilada, codsi ka yimaada Madaxweynaha ama ¼ xubnaha golaha wakiilada ayaga oo dhamaan codsi qoraal ah ku soo dalbaya.
3. Golaha fulinta Dowlad Goboleedka waxaa loogu yeeri karaa ama ay dalban karaan ka qeybgalka kalfadhiyada golaha wakiilada, si ay uga jawaabaan ama cadeymo uga bixiyaan su'aalo xilkooda khuseeya.
4. Haddii ay timaado xaalad deg deg ah waxaa ansixinaya golaha wakiilada 10

cisho gudahood.
5. Kalfadhi kastaa oo golaha wakiilada yeelanaayo wuxuu ku furmayaa 2/3 tirada guud ee golaha.

**Qodobka 42aad: Xil Waayidda Xubnaha Golaha Wakiilada (Baarlamaanka)**
Xubnaha Golaha Wakiilada waxay xilkooda ku waayi karaan:
1. Geeri ku timaada xubinta Golaha Wakiilada
2. Istiqaalo qoraal uu u soo gudbiyo Gudoonka Golaha Wakiilada
3. Xil gudasho la'aan joogto ah
4. Xukun ciqaabeed kama dambeys ah oo ay maxkamad ku riddo.

**Qodobka 43aad: Xasaanada xubnaha Golaha wakiilada & Golaha Fulinta ee Dowlad Goboleedka.**

Wakiilada & xubnaha Golaha Fulinta ee Dowlad Goboleedka waxay leeyihiin xasaanad buuxda.
1. Lama qaban karo lamana xiri karo, hadii aan lagu arkin isaga oo fal danbiyeed faraha kula jira.
2. Lama Baari karo hoygiisa.
3. Dacwad ciqaab la xiriirta laguma soo oogi karo.
4. Haddii uu dembi galo, xeer ilaliyaha Guud wuxuu Golaha Wakiilada soo weydiisanayaa in xasaanadda laga qaado si loo soo eedeeyo.

**Qodobka 44aad: Golaha Fulinta (Xukuumadda)**

Hay'adda Fulinta ee Dowlad Goboleedka waxay ka kooban tahay:-
1. Madaxweynaha
2. Madaxweyne ku xigeenada.
3. Wasiirro
4. Wasiir ku xigeenno

**Qodobka 45aad: Doorashada Madaxweynaha Dowlad Goboleedka.**

1. Marxaladan 1aad, waxaa Madaxweynaha cod hal dheeri ah ku dooranaya odayaasha dhaqanka iyo ergada shirweynaha.
2. Madaxweyne ku xigeenada waxaa magacaabaya madaxweynaha asagoo la tashanaya odayaasha dhaqanka.
3. Laga billaabo maalinta la doorto madaxweynaha, Lixdan maalmood (60) gudahood odayaasha dhaqanka waxay ku soo xulayaan xubnaha golaha



GUDIGA FARSAMADA EE MAAMUL U SAMEYNTA KOONFUR GALBEED SOOMAALIYA

wakiilada.

**Qodobka 46aad: Shuruudaha Madaxweynaha.**

Waxaa loo dooran karaa xilka madaxweynaha Dowlad goboleedka Muwaadin kasta oo:

1. Muwaadin soomaali ah, u dhashay degaanada KGS uuna qabin xaas ajnabi ah
2. In uu Muslim yahay kuna dhaqmo diinta islaamka.
3- Da'diisu aaney ka yareyn 40 sano.
4- Leh aqoon ama waaya aragnimo u qalanta xilkaas.
5- Dhimirkiisu dhanyahay.
6- Gelin denbi culus oo ay maxkamadi xukuntay.

**Qodobka 47aad: Shuruudaha Madaxweyne ku xigeenada**

Waxaa loo magacaabi karaa xilka madaxweyne kuxigeenada Dowlad goboleedka Muwaadin kasta oo:

Muwaadin soomaali ah, u dhashay degaanada KGS uuna qabin xaas ajnabi ah.

In uu Muslim yahay kuna dhaqmo diinta islaamka.

Da'diisu aaney ka yareyn 40 sano.

Leh aqoon ama waaya aragnimo u qalanta xilkaas.

Dhimirkiisu dhanyahay.

1. Gelin denbi culus oo ay maxkamadi xukuntay.

**Qodobka 48aad: Xilka iyo Awoodaha Madaxweynaha.**

1. Madaxweynaha waa madaxa dowlad goboleedka iyo gudoomiyaha golaha fulinta.
2. Madaxweynaha wuxuu leeyahay magacaabidda/ xil kaqaadista xubnaha golaha fulinta isaga oo la tashanaayo kuxigeenadiisa.
3. Madaxweynaha waa taliyaha guud ee ciidamada dowlad goboleedka.
4. Wuxuu leeyahay awoodda fulinta saamaxaada iyo cafiska, marka uu helo talo ay soo jeediyaan hay'addaha garsoorka.
5. Madaxweynahu wuxuu leeyahay awooda hadal jeedinta furitaanka

kalfadhiyada golaha wakiilada.

6. Madaxweynahu wuxuu saxiixayaa xeerarka golaha wakiilada soo ansixiyaan.
7. Madaxweynahu wuxuu awood u leeyhay dib u celinta xeerarka golaha wakiiladu soo ansixiyaan, waana in uu sababeyn cad raaciyaa dib u celinta xeerka.

**Qodobka 49aad: Xilka iyo awoodaha Madaxweyne ku xigeenada.**

1. Madaxweyne ku xigeenada dowlad goboleedka waxay qabanayaan xilka madaxweynaha marka uu ka maqan yahay madaxweynaha dhulka dowlad goboleedka, waxaa qabanaya madaxweyne kuxigeenka 1aad.
2. Madaxweyne ku xigeenada waxay qabanayaan howlaha uu u xil saarto Madaxweynaha Dowlad Goboleedka.

**Qodobka 50aad: Mudada Xilka madaweynaha iyo golaha fulinta.**

1. **Mudada xilka Madaxweynaha dowlada goboleedka iyo golahiisa fulinta waa 4 sano (Afar sano)**
2. **Madaxweynaha Dowlad Goboleedka waxaa la dooran karaa laba xili doorasho.**

**Qodobka 51aad: Xil waayidda Madaxweynaha**

Madaxweynaha waxa uu xilkiisa ku waayi karaa qodobada soo socda:

1. Istiqaalo qoraal ama mid afka ah oo uu siiyo saxaafadda.
2. Geeri ku timaada.
3. Xil gudasho la’aan joogto ah.
4. Xukun Ciqaabeed oo ay maxkamad ku riday.
5. Mooshin Eedayn ah (impeachment) oo ay soo jeediyeen (1/3) oo ay u codeeyeen seddex dalool laba (2/3) Golaha Wakiilada.
6. Haddii madaxweynuhu waayo xilkiisa, waxaa xilka la wareegaya madaxweyne ku xigeenka kowaad.
7. Madaxweyne ku xigeenka xilka la wareegey wuxuu dhameystirayaa kaliya mudada u harsaneyd madaxweynihii hore ama in 30 maalmood gudahooda lagu doorto.

**Qodobka 52aad: Xil waayidda Madaxweyne kuxigeenada**

Madaxweyne ku xigeenada waxay xilkooda ku weynayaan sida ku qeexan qodobka 46aad faqradihiisa 1aad ilaa faqradiisa 5aad.

**Qodobka 53aad Shuruudaha Xubnaha Golaha Wasiirada (Fulinta)**

1. **Waa inuu yahay muwaadin soomaali ah una dhashay gobolada KGS.**
2. **Waa in da,diisu ka yaraan 30 sano.**
3. **Waa inuu leeyahay aqoon heer jaamacadeed iyo waayo aragnimo ku filan.**
4. **Inuusan gelin denbi maxkamadi xukuntay.**

**Qodobka 54aad: Magacaabista Golaha fulinta (Wasiirada)**

1. Xubnaha Golaha Wasiirada waxaa magacaabaya Madaxweynaha Dowlad Goboleedka waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada.
2. Golaha wasiirada waxaa laga soo xulayaa gudaha ama dibada golaha wakiilada.
3. Madaxweynaha wuxuu kala tashanayaa magacaabista golaha Wasiirada ku xigeenadiisa iyo odayaasha dhaqanka.

**Qodobka 55aad: Xilka iyo awoodaha Golaha fulinta (Wasiirada)**

1. Golaha Wasiirada waxaa shir gudoominaya Madaxweynaha Dowlad Goboleedka.
2. Madaxweynaha isaga oo ku sugan Dowlad Goboleedka wuxuu shir guddoonka u xilsaari karaa Madaxweyne ku xigeenadiisa mid ka mid ah.
3. Haddii Madaxweynuhu ka maqan yahay dhulka Dowlad Goboleedka ama meel ka baxsan xarunta Dowlad Goboleedka waxaa xilkiisa sii haynaya Madaxweyne ku xigeenka 1aad.
4. Golaha Wasiirada waa awooda ugu sarreysa ee fulinta Dowlad Goboleedka.
5. Golaha wasiirada waxay mas'uul ka yihiin jaan goynta siyaasadda, maareynta iyo socod siinta howl maalmeedka Dowlad Goboleedka.
6. Go'aanada Golaha Wasiirada waa cod hal dheeri ah 50%+1 xubnaha golaha, haddii aan sharciga si kale u tilmaamin.

**Qodobka 56aad: Xil Waayidda Golaha Wasiiradda**

Xubin Kamid ah golaha wasiirada ama xubin ka mid ah waxay xilkooda ku waayi karaan.

1. Geeri

2. Istiqaalo qoraal ama af ah
3. Xil gudasho la'aan joogto ah.
4. Waayidda codka kalsoonida Golaha Wakiilada 50%+1.

Hadii Golaha Wasiirada xilkooda waayaan Madaxweynaha wuxuu 30 Cisho gudahood ku soo magacaabayaa Gole Wasiiro.

**Qodobka 57aad: Dhaarta Madaxda Dowlad Goboleedka:**

1. Mas'uul kasta oo xil u qabanayo Dowlad Goboleedka wuxuu marayaa dhaarta hoos ku xusan:

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, waxaa igu Wallaahi ah, igu Billaahi ah, igu Tallaahi ah, oo aan magaca Ilaah ugu dhaaranayaa, inaan u guto xilkeyga si daacad ah, oo ay danta dadka, dalka iyo diintuba ku jirto, dhowrayana Dastuurka iyo Shurucda kale ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed u degsan.

2. Mas'uulka wuxuu dhaartan marayaa ka hor inta uusan xilka la warreegin.
3. Guddoomiyaha ama Garsoore ka tirsan Maxkamadda sare ee Dowlad Goboleedka ayaa dhaarinaya mas''uul kasta oo xil u qabanayo Dowladda.

**Cutubka 4aad:- Kaabayaasha.**

**Qodobka 58aad: Kaabayaasha Dowlad Goboleedka**

1. Dowlad Goboleedka wuxuu yeelanayaa kaabayaasha kala ah:
   a) Xeer ilaaliyaha guud
   b) Xisaabiyaha guud
   c) Hanti dhowrka guud
   d) Garyaqaanka guud
   e) Bangiga Dhexe Dowlad Goboleedka
2. Golaha wakiilada ayaa dejin doona xeerka iyo waajibaadka kaabayaasha ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.
3. Kaabayaasha ku xusan faqradda 1aad waxay mas'uuliyaddooda ku baahinayaan dhamaan deegaanada Dowlad Goboleedka.

**Qodobka 59aad: Golaha Odayaasha dhaqanka**

1- Golaha odayaasha dhaqanka KGS waa gole dastuuri ah kana kooban hogaamiyeyaashа dhaqanka beelaha deegaanada KGS.

**Qodobka 60aad:waajibaadka golaha dhaqanka KGS waxaa ka mid ah:**

**a)** Ka shaqeynta Nabadda iyo Maslaxadda Umadda KGS.

**b)** Horumarinta Dhaqanka Suuban oo ku Saleysan Shareecada Islaamka iyagoo ka fogaanaya siyaasada

**c)** Xilligan ku meelgaarka ah, Golaha Odayaasha Dhaqanka waxay marjac u noqon karaan markey lasoo gudboonaato xaalad Golayaasha Dowlada ayna ugu yeertaan Golayaasha ama mid ka mid ah.

**d)** Golaha Odayaasha Dhaqanka waxay noqon karaan Garsoor lagu go'I karo markii loo baahdo.

**e)** Golaha Odayaasha Dhaqanka waxay soo xulayaan Xubnaha Golaha Deegaanka ee heer Degmo iyagoo la tashanaaya Beelahooda, waxayna usoo gudbinayaan Wasaarada Arrimaha Gudaha ee Dowlad Goboleedka.

**f)** Sabab kasta haku timaadee, haddii Golaha Wakiilada aysan dhisneyn, Golaha Odayaasha Dhaqanka ayaa buuxinaaya kaalinta Golaha Wakiillada.

**g)** Golaha Odayaasha Dhaqanka waxaa laga talo gelinayaa arrimaha waa-weyn ee Masiiriga ah markii ay baahi timaado.

**h)** Golaha Dhaqanku waxay yeelanayaan xeer hoosaad nidaaminaya howlahooda u gaarka ah ee waafaqsan Dastuurka Qaranka iyo Kan Dowlad Goboleedka.

**Qodobka 61aad: Xuquuqda iyo Xasaanada Golaha Dhaqanka KGS:**

Xubin kasta waxay leedahay Xasaanad buuxda, lama xiri karo, lamana baari karo Hoygooda iyo Jirkooda haddii aan fal-dembiyeed faraha kula jirin.

a. Si nabad-gelyadooda xil-gaar ah la isaga saaro, xubin kasta waxay xaq u leedahay in loo ogolaado haysashada hub fudud si waafaqsan shuruucda amniga Qaranka.

b. Xubnaha Golaha Dhaqanka waxay yeelan doonaan xaquuq maaliyadeed oo ka kooban:

1. Gunno bileed joogta ah
2. Daryeel Caafimaad
3. Golaha Odayaasha Dhaqanka waxay soo jeedin

karaan Miisaaniyad ku saleysan Qorshe-howleedkooda iyadoo loo gudbinaayo Golaha Wakiilada si ay u ansixiyaan.

**Qodobka 62aad: Waayidda Xubinnimada Golaha Odayaasha  Dhaqanka:**

Xubinnimada Golaha Dhaqanka waxaa lagu waayi karaa:

1. Geeri
2. Istiqaalo Qoraal ah ama Warbaahinta laga sii daayo
3. Xukun-ciqaabeed kama dambeys ah oo Maxkamad ay go’aamisey
4. Xil-gudasho la’aan joogta ah oo ay sabab u tahay dhimmir la’aan ku timid jirro ama da’a.

**<u>Cutubka 5aad:-</u> Nidaamka Xisbiyada Siyaasadeed iyo Doorashooyinka:**

**Qodobka 63aad: Nidaamka Xisbiyada Siyaasadeed.**

1-Dawlad-Gobeleedka Koonfur Galbeed waxaa lagaga dhaqmayaa nidaamka Xisbiyada Badan.

2-Golaha wakiilada ayaa ka soo saari doona xeer gaar ah oo faah faahinaya qaabka iyo hab dhismeedka xisbiyada siyaasadeed.

3-Waxaa reeban xisbi kasta ee siyaasadeed oo u abaabulan hab qabyaaladeeysan ama qarsoodi ah ama hubeysan.

**Qodobka 64aad; Tirakoobka Dowlad Goboleedka.**

1. Dadweynaha ku nool Dowlad Goboleedka KGS 10(tobankii) sanaba mar ayaa la tirakoobayaa.
2. Waqtiga tirakoobku bilaaban doono xeer gaar ah ayaa laga soo saari doonaa.

**Qodobka 65aad: Nidaamka Doorashooyinka Dowlad Goboleedka:**

1. Waxaa jiraya gudi doorasho oo gudoonka goluhu wakiilada soo jeediyo waxaa ansixinaya golaha wakiilada.

2. Waxaa gudiga doorashada la magacaabayaa labo bilood ka hor waqtiga doorashada, Waxuuna gudidu jirayaa labo bilood ka dib dhamaadka natiijada doorashada.

3. Gudigu waxuu u hogaansamayaa sharciga oo kaliya.

4. Marka la ansixiyo gudiga doorashada guud ahaan iyo gaar ahaan toona xilka lagama qaadi karo, Waxna lagama badali karo.

5. Gudiga warbixinta doorashada waxuu u soo gudbinayaa gudoomiyaha golaha wakiilada, Madaxweynaha iyo maxkamada sare.

6. gudoomiyaha gudiga doorashada waxa uu soo jeedinayaa war bixinta gudoonka golaha wakiilada waxaana ansixinaya golaha.

7. Tirada gudiga doorashada kama yaraan karaan 15(Shan iyo toban) Xubnood.

8.Awoodaha iyo xil waajibaadka gudiga waxa lagu soo qeexayaa xeer gaar ah oo golaha wakiilada soo saaro, Ansixiyana.

## <u>Cutubka 6aad:-</u> Garsoorka Dowlad Goboleedka

### Qodobka 66aad: Awooda Garsoorka

1. Awooda garsoorka Dowlad Goboleedka waxaa u xilsaaran Maxkamadaha.
2. Qaab dhismeedka garsoorka waxaa xeer gaar ah ka soo saaraya golaha wakiilada.

### Qodobka 67aad: Madax banaanida Garsoorka.

1. Garsoorku wuxuu ka madax banaan yahay hay'adaha sharci dejinta iyo fulinta marka uu waajibaadkiisa gudanayo.
2. Xubnaha garsoorku waxay u hogaan samayaan sharciga.
3. Garsooraha laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani oo ka dhalatay fal la xidhiidha waajibaadkiisa garsoorennimo.
4. Garsooraha lama baari karo qofnimadiisa ama hoygiisa,hadii aan ogalaasho looga haysan golaha adeega garsoorka.

### Qodobka 68aad: habka dacwad qaadista maxkamadaha.

1- Dacwad qaadistu waxay u furan tahay dhageysiga dadweynaha, hasa yeeshee maxkamaduhu waxay go'aansan karaan in dacwada lagu dhageysto qol ka xiran dadweynaha sababo la xiriira anshaxa, nabad gelyada, badbaadinta marqaatiyaasha.

2- Go'aan maxkamadeed lama gaari karo hadii aan la siinin dhinacyada fursado isku mid ah oo ay ku soo bandhigaan doodahooda iyo cadeeymahooda.

3- Go'aan kasta oo maxkamadeed waa in uu ku qotamo sababo sharciyeed.

### Qodobka 69aad: Qaabka Maxkamadaha Dowlad Goboleedka.

Maxkamadaha dowlad goboleedka waxay noqonayaan afar heer oo kala ah:

1. Maxkamadda Sare ee Dowlad Goboleedka
2. Maxkamadda Rafcaanka ee Dowlad Goboleedka
3. Maxkamaddaha heer Gobolka
4. Maxkamaddaha heer Degmada

**Qodobka 70aad: Guddiga adeega Garsoorka.**

Dowlad goboleedka waxaa waajib ku ah dhisida gudiga adeega garsoorka.

1. Gudiga adeega garsoorka waxuu ka koobnaanayaa todobo xubnood oo kala ah sida soo socota:
   a) Garsooraha maxkamada sare ee dowlad Goboleedka.
   b) Sadex Garyaqaan oo ay soo magacaabeen ururka garyaqanada dowlad Goboleedka.
   c) Sedex qof oo xushman weyn ku dhex leh bushada rayidka golaha wasiiradana soo sharaxaan.
2. Gudiga adeega Garsoorka ee dowlad goboleedka waxaa maga caabaya Madaxweynaha.
3. Xubnaha gudiga adeega garsoorka waxay is ka dooranayaan gudoomiyaha guddiga.
4. Xubnaha guddiga adeega garsoorka waxay xilka haynayaan hal xili oo magacaabis ah oo lacus boonaysiin karo.
5. Wixii xeer ah ama qaynuun ay samaystaan guddiga adeega garsoorka oo khusayo anshax marinta garsoorayaasha heerarka kala duwan ee maxkamadaha Dowlad gobolayka iyo guddiga adeega garsoorka.
6. Sida sharciga ama xeerkuba qabo guddiga adeega garsoorka:
   a) waa in uu magacabaa anshax mariyaa isla markaana badalaa xubnaha garsoorka ee dowlad goboleedka.
   b) Waa in uu go’aamiyaa mushaharka iyo lacagta howl gabka ee garsoorayaasha, diyariyaana shuruudaha shaqo ee garsoorka.

**Qodobka 71aad: Maxkamadda  Sare ee Dowlad Gobaleedka.**

1.  Maxkamadda Sare ee Dowlada Gobaleedka K/Galbeed waa tan ugu saraysa maxkamadaha caadiga ah.

2.  Maxkamadda Sare waxa ay leedahay awoodda qaadista dacwadaha.

3. Dacwadaha laga soo qaatay racfaan ee xukunnaddoodu ka soo Dhamaadeen Maxkamadaha Racfaanka.

4. Dacwadaha idaariga ah oo iyagu toos uga bilawda Maxkamdda Sare.

5.  Fadhiga Maxkamadda Sare waa caasimadda Dowlad Goboleedka

6., waxayna dacwadaha ku qaadi kartaa meel kasta oo ka mid ah deeganada Dowlad Goboleedka.

5.  Tirada Garsoorayaasha Xubnaha ka ah Maxkamadda Sare waa Todoba Xubnood oo kala ah:

    a)  Guudoomiye.

    b)  labo Guddoomiye ku xigeeno.

    c)  Garsoorayaal saddax ah.

**Qodobka 72aad: Magacaabista Guddoomiyaha Maxkamadda sare.**

1-Godoomiyaha Maxkamada Sare ee Dowlad goboleedka waxaa magacaabaya Madaxweynaha, waxaana ansixinaya Golaha Wakiilada.

**Qodobka 73aad:  Xil ka qaadista Guddoomiyaha Maxkamadda sare.**

1.Soo jeedin Xukuumada oo ay golaha wakiilada Dowlad Goboleedka ansixiyaan.

2.Mooshin ka dhan ah oo ay soo jeediyeen ugu yaraan 25 wakiil goluhuna 2/3 ku ansixiyeen.

**Cutubka 7aad: Xeer Ilaalinta Guud**

**Qodobka 74aad: Xarunta Xeer ilaalinta**

1)- Xarunta Xeer ilaalinta Guud waa Caasimadda Dowlad Gobolleedka.

2)- Awoodda Xeer ilaaliyaha Guud waxa ay ku fidsan tahay deegaanada Dowlad Galbeedka oo dhan.

**Qodobka 75aad: Magacaabista Xeer ilaaliyaha Guud**

Xeer ilaaliyaha Guud ee Dowlad goboleedka waxaa magacaabaya Madaxweynaha, waxaana ansixinaya Golaha Wakiilada.

**Qodobka 76aad: Xil ka Qaadista Xeer ilaaliyaha Guud**

1- Soo jeedin Xukuumada oo ay golaha wakiilada Dowlad Goboleedka ansixiyaan.

2- Mooshin ka dhan ah oo ay soo jeediyeen ugu yaraan 25 wakiil goluhuna 2/3 ku ansixiyeen.

**Cutubka 8aad: Baahinta Maamulka.**

**Qodobka 77aad: Baahinta Maamullada Gobollada iyo Degmooyinka**

1. Dowladda Goboleedka Koonfur-galbeed waxay ku dhaqmeeysaa Mabaadi'da baahinta xukunka heer tuulo, degmo & gobol.

2. Maamulada Degmooyinka iyo Gobolada waxay ku dhismayaan habka is maamulka bulshada, waxaana lagu dhisayaa xeer u gaar ah ay soo gudbisay xukuumada golaha wakiiladuna ansixiyaan.

**Cutubka 9aad: Shaqaalaha**

**Qodobka 78aad: Ilaalinta Shaqaalaha Dowladda**

1- Dowladda waxay iska xil saareysaa shaqo abuurista iyo tayaynta Tababarada Shaqaalaha.

2- Waxaa reeban shaqo qasab ah, hadii aan qaynuunku si kale u

Tilmaamin, xeer gaar ah ayaana lagu sii faahfaahin doonaa

3- Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay mushahar u dhigma shaqada uu qabanayo.

4- Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay maalin nasasho ah todobaadkiiba, fasax sanadeed, fasax dhalmo iyo ciidaha uu qaynuunku jideeyay, iyada oo aan xuquuqda qofka wax loo dhimin.

5- Dowladda waxay daryeeleysaa shaqaalaha jir ahaan iyo damiir Ahaanba.

6- Shaqaalahu waxay xaq u leeyihiin in ay cabashadooda ku muujiyaan banaanbax ama shaqo joojin, markii laga reebo ciidamada sida xeerka waafaqsan.

7- Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu doorto shaqada uu rabo.

**Qodobka 79aad: Xuquuqda Shaqaalaha**

Dastuurka Dowlad Goboleedka wuxuu u damaanad qaadayaa:

1- Shaqaalaha mid ciidan iyo mid madaniba xaqa howl-gabnimo.
2- Shaqaalaha oo xil u haya dowladda oo ay wax gaaraan, ama jirrada, ama howl-gaba, wuxuu xaq u leeyahay daryeel qaynuunka waafaqsan.

**Cutubka 10aad:Dhulka, Hantida iyo Deegaanka.**

**Qodobka 80aad: Dhulka.**

1. Dhulka Waa kheyraadka koowaad ee Dowlad Goboleedka iyo saldhiga nolosha dadka.

2. Dhulka waa in loo haystaa, loona adeegsadaa, loona maamulaa si cadaalad ah waxtar leh wax soo saarna leh.

3. Dowlad goboleedka waa in ay dejiso siyaasad dhuleed oo ilaalineysa xaquuqda lahaanshaha dhuleed ee soo jireenka ah, waafaqsan sharuucda iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo si joogta ah dib u eegis loogu sameeyo waana in ay xaqiijiso:

a) U sinnaanshaha fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa.

b) Damaanad qaadista xuquuqda lahaanshaha dhulka iyo diiwaan gelinta.

c) In si deg deg ah lagu wada qanci karo loo xalliyo khilaafaadka ka dhasha dhulka iyo hantida.

d) In la xaddido dhulka uu qof ama shirkad yeelan karaan.

e) In Dowlad Goboleedka xaqiijiso ka faa'iideysiga dhulka si waafaqsan mabaa'di'da ka faa iideysiga dhulka ayadoon dhibaato loo geysaneen.

f) in la nidamiyo dhaq dhaaqaaqa suuqa ka ganacsiga dhulka, si looga hortago ku tagri falida milkiilayaasha dhulka ee yar yar.

4. lama bixin karo isticmaal dhuleed oo abidi ah.

**Qododbka 81aad: Kala Gadashada Hantida Umadda**

2- Waxaa reeban kala gadashada iyo iibinta hantida guud ee ummadda.

**Qodbka 82aad: La wareegidda Hantida Gaar ahaaneed**

1. Dowladda waxay la wareegi kartaa hantida gaar loo leeyahay dan guud awgeed.
2. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya hantida dan guud darteed loola wareegayo.
3. Dowladdu waxay bixineysaa mag dhaw u dhigma hantida lala wareegayo uuna ku qanacsan yahay milkiilaha.
4. Hantida ma guurtada ah: mid qaran iyo mid gaar ahaaneedba ee milkiilaheedu uu maqan yahay, ama aysan jirin cid wakiil u ah, waxaa daryeelkeeda iyo ku dhaqankeedaba mas'uul ka ah dowlada Goboleedka.
5. Hantida loola wareegay dan guud ee hadana lagana maarmay waxaa loo celinayaa qofkii asal ahaan lagala wareegay.

**Cutubka 11aad:Ciidamada**

**Qodobka 83aad: Ciidamada Dowlad Goboleedka**

Ciidamada dowlad goboleedka waxay ka kooban yihiin:

a) Ciidanka Booliiska

b) Ciidanka Daraawiishta

c) Ciidanka Nabad-Sugidda

d) Ciidanka Asluubta

**Qodobka 84aad: Habka Dhaqaalaha Fur furan Dowlad Goboleedka**

1- Waxay ku dhaqmaysaa habka dhaqaale suuqa xorta ah (free market)

2- Waxay hirgelinaysaa, damaanadna siineysaa maalgelinta deegaanadeeda, maalgashadayaasha wadaniga ah iyo kuwo Shisheeyaha ahba.

3- Habka ganacsiga waa tartan furan.

4- Waxaa reeban qodob ka hor imanaya tartanka ganacsiga ah.

**Qodob 85aad; Daryeelka Deegaanka**

Dowladda waxay mamnuuceysaa:

1. Xaalufinta iyo nabaad guurinta deegaanka Bad, Cir iyo Beriba,
2. Dhoofinta dhuxusha, ka ganacsiga iyo dhoofinta dhirta qoyan iyo tan qalalanba.
3. Dhoofinta Xoolaha dhedigga ah.
4. Ugaarsiga iyo dhoofinta Duurjoogta
5. Dastuurka waxa uu mamnuucayaa deegaameynta meelaha aan ku habooneyn.

**Qodobka 86aad; Wax Ka Bedelka Dastuurka**

Wax ka bedelka Dastuurka wuxuu ku meel mari karaa:

1- Moshin sababeysan ay soo gudbiyaan 30 xubnood oo ka tirsan Golaha Wakiilada, wuxuuna ku meel marayaa cod bixin ogol ah 2/3 Xubnaha Golaha Wakiilada.

2- Soo jeedin ka timaada Xukuumadda Dowlad Goboleedka, wuxuuna ku meel marayaa 50%+1 Xubnaha Golaha Wakiilada.

3- Dastuurka markii la ansixiyo mudo sanad ah waxba lagama bedeli karo, sanad ka dib hadii wax laga bedelo ilaa labo kal fadhi hadana waxba lagama bedeli karo.

**Qodobka 87aad; Damaanad Qaadka Dastuurka**

1- Dastuurka ayaa saldhig u ah dhamaan qawaaniinta dalka loo dejinaayo KGS.

**Qodobka 88aad; Nuqulka Rasmiga ah ee Dastuurka**

Nuqulka Rasmiga ee Dastuurka waa Nuqulka af Soomaaliga ku qoran ee dastuurkan ayaa ah aqoonsiga rasmiga, wuxuuna dhaqan galayaa ka dib markii uu Ergada shirweynuhu ansixiyo.

Baydhabo Soomaaliya